

# Ku soo dhowow waxbarasho-horaadka- macluumaadka waxbarasho-horaadka ee waalidiinta loogu talagalay

Cunug kasta wuxuu sannad kahor billaabashada waajibka waxbarashada ka qaybgelayaa waxbarasho-horaadka. Agoosto 2023 waxaa inta badan waxbarasho-horaadka billaabaya carruurta dhalatay sannadkii 2017. Waxbarasho-horaadku waa lacag la'aan waxaana inta badan la bixiyaa afar saac-dood maalintii oo u dhexeysa 8.30–13.30 saac inta lagu jiro wakhtiyada ay dugsiyadu shaqeeyaan. Waxbarasho-horaadka ku baxda afka finnishka iyo iswiidhishka waxaa magaalada Helsinki looga qabanqaabiyaa xannaano-maalmeedyada degmada iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Barbaarin-horaadka buuxiyaha waxbarasho-horaadka wuxuu isagoo la eg intiisi hore ee ka horeysay billaabashada waxbarashada, haddii aanay isbeddelin baahida taas loo qabo. Inta badan waxaa barbaarin-horaadka buuxinta ah lagu qabanqaabiyaa isla goobta ama kooxda cunugga ee uu waxbarasho-horaadka ku qaadanayo.

## Carruurta ku jirta barbaarin-horaadka degmada

Adigoo ka mas'uul ah cunugga ku jiro barbaarin-horaadka degmada, waxaad goobta barbaarin-horaadka ku aqbalaysaa ama ku diideysaa muddada u dhexeysa 6.2.–17.2.2023 adeegga dan-qabsashada ee Asti. Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa lagu bixinayaa qaab ku salaysan cinwaanka guriga ee shaqaynaya 23.1.2023. Go'aannada boosaska waxbarasho-horaadka ee la aqblay waxaa 3.3.2023 lagu soo dirayaa adeegga suomi.fi. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qabanqaabinta waxbarasho-horaadka waxaad ka heleysaa [hel.fi/esiopetus](https://hel.fi/esiopetus)

Goobta waxbarasho-horaadka ee ilmaha la siinayo waxay waafaqsan tahay cinwaanka guriga cunugga ee nawaaxiga ardayda lagu qaabilo ee ardaygu uu dagaanka ku yahay waxana sidoo kale lagu xisaabtamayaa dugsiya u dhow cinwaanka guriga. Waxaa kale oo cunugga goobta waxbarasho-horaadka laga siin karaa meel kale oo aan waafaqsanayn cinwaanka gurigiisa ee nawaaxiga qaadashada ardayda, sababo la xiriira baahida taageerada gaarka ah ee cunugga, luqad ku harqinta ama shaqada kaltanka ah darteed.

## Carruurta ku jirta barbaarin-horaadka gaarka ah, waxqabadka naadiga ama guriga ku xannaanaynta

Haddii aad tahay mas'uulka cunug ku jira barbaarin-horaad gaar loo leeyahay, waxqabadka naadiga ee ay magaaladu qabanqaabiso ama cunug guri lagu xannaaneeyo, waxaa muddada u dhexeysa 9–20.1.2023 ka diiwaangelinaysaa cunuggaada waxbarasho-horaadka degmada adigoo isticmaalaya adeegga dan qabsashada ee Asti. Boosaska waxbarasho-horaadka waxaa lagu bixinayaa qaab ku salaysan cinwaanka guriga ee shaqaynaya 23.1.2023. Go'aannada boosaska waxbarasho-horaadka ee la aqblay waxaa 3.3.2023 lagu soo dirayaa adeegga suomi.fi.



**Kasvatus ja koulutus**  
[hel.fi/esiopetus](https://hel.fi/esiopetus)  
#HelsinkiOppii

## Waxbarasho-horaadka lagu bixiyo xannaanada gaarka loo leeyahay

Waxbarasho-horaadka xannaanada gaarka loo leeyahay waxaa si toos ah looga codsanayaa xannaanada markaas la rajaynayo iyadoo la isticmaalo foomka codsiga waxbarasho-horaadka (hel.fi/esiopetus). Wakhtiga codsiga ee barbaarin-horaadka gaarka loo leeyahay waa 9.-20.1.2023. Go'aanada waxbarasho-horaadka waxaa waaliidiinta boostada loogu dirayaa Febraayo-Maarso 2023.

## Carruurta ka qaybgeleysa waxbarasho-horaadka labada sano ah ee tijaabada ah

Cunugga ku jira waxbarasho-horaadka labada sano ah ee tijaabada ah wuxuu muddada labada sano ah uga qaybqaadanayaa waxbarasho-horaadka goobta waxbarashada ee uu tijaabada ka bilaabay. Looma baahna in waxbarasho-horaadka markale la codsado kaddib marka uu dhammaado sannadka koowaad ee tijaabada, waxbarasho-horaadkuna waxay ka sii soconaysaa isla goobta waxbarashada ee uu hadda ku qaato waxbarasho-horaadka labada sano ah ee tijaabada.

## Sisäänkirjautuminen (Gelista gudaha)

Ku fur borowsarka kambuyuutarkaada, tableeti-gaada ama telefoonkaada casriga ah.

- ▶ U wareeg cinwaanka **asti.hel.fi**
- ▶ Ka dooro luqadda waxqabadka ee doonayso dhinac kore ee midig ee bogga
- ▶ Riix badhanka **Kirjautu sisään** (Gal gudaha)
- ▶ Muuji aqoonsigaada adigoo isticmaalaya habka aqoonsi ee dooratay
- ▶ Dooro **Jatka** (Sii wad)
- ▶ Dooro **Jatka palveluun** (Sii wad adeegga)
- ▶ Hubi macluumaadkaada kaddib horay u sii soco

## Esiopetuspaikan vastaanottaminen (Guddoomista goobta waxbarasho-horaadka)

Barta cunugga ayaad ku arkaysaa wargelin ku saabsan guddoomista booska waxbarasho-horaadka, marka ay isdiwaangelintu socoto.

Riix badhanka **Hyväksy / hylkää** (Aqbal / diid)

1. Dooro **Haa, waan qaadanayaa booska la i siiyay** ama **Maya, ma qaadanayo booska la i siiyay**
2. Riix **Jatka seuraavaan** (Siiwad kan xiga)
3. Hubi macluumaadka kaddibma riix **Lähetä** (Dir)



Helsinki

Kasvatus ja koulutus  
hel.fi/esiopetus  
#HelsinkiOppii